



Awoodda Xaddidan ee Wakiilka ee Dheefaha WA Cares Fund



Limited Power of Attorney for WA Cares Fund Benefits

| |
|--|
| Magaca Ka-faa'iideystaha |
| Lambarka Aqoonsiga WA Cares (haddii la garanayo) |

Waa maxay Awoodda Xaddidan ee Wakiilka Dheefaha WA Cares Fund?

WA Cares Fund waa Barnaamijka Taageerooyinka iyo Adeegyada Muddada-Dheer ee lagu dhisay si waafaqsan cutubka 50B.04 RCW. Foomka Awoodda Xaddidan ee Wakiilka ah Dheefaha WA Cares Fund waa dokumenti sharci ah oo u oggolaanaya qofka aad dooratay in uu waxqabto isaga oo adiga kaa wakiil ah iyo in uu qaato go'aamo ku saabsan dheefahaaga WA Cares, sida loo maamulo waafaqsan cutubka 50B.04 RCW, oo ay ku jiraan go'aamada lagu qaatay Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada iyo Waaxda Sugnaanta Shaqada. Heshiiska wakiilka (power of attorney), qofka aasaasiga ah waa qofka bixiya awoodda wakiilka, iyadoo qofka helaya awoodaasina loo yaqaanno wakiil ama qareen dhab ah. Foomkan waxaa lala wadaagi doonaa Waaxda Sugnaanta Shaqada.

Ma u baahanahay in aan buuxiyo Awoodda Xaddidan ee Wakiilka loogu talagalay foomka Dheefaha WA Cares Fund?

Lagaaga ma baahna in aad leedahay awoodda wakiil. Lagaaga ma baahna in aad isticmaasho foomkan si aad u fuliso heshiiska qareenka wakiilka ah. Buuxinta foomkan waa ikhtiyaari oo waxaa laga noqon karaa waqti kasta.

Ka waran haddii aan horey u lahaa qareen wakiil iga ah?

Haddii aad horey u lahayd qareen wakiil kaa ah, waxaad dib-u-eegi kartaa dokumentigaasi si aad u go'aamiso haddii aad wakiilkaaga siinayso awood uu kugu metelo oo uu ku gaaro go'aamada ku saabsan dheefahaaga WA Cares. Haddii ay sidaa tahay, waxaad bixin kartaa nuqulka WA Cares. WA Cares waa in uu haystaa nuqul ku jira gal oo loogu talagalay wakiilkaaga ama qareenkaaga dhabta ah si uu u maareeyo dheefahaaga isaga oo adiga kaa wakiil ah.

Ka waran haddii aan qabo su'aalo ku saabsan fulinta awoodda wakiilka?

Afeef: Hawlwadeennada WA Cares ma bixin karaan talo sharci ama kama jawaabi karaan su'aalaha ku saabsan sida foomkan loo buuxiyo. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan haddii la fulinayo heshiiska wakiil ama sida taa loo sameeyo, waa in aad qareen la tashataa.

Macluumaad dheeraad ah iyo kheyraadyo sharci ayaa waxaa laga heli karaa Mashruuca Cadaaladda Northwest/

Mareegtada: www.nwjustice.org **Telefoonka:** 1-888-201-1012

| Foomka soo gudbi: | Loogu baahan yahay fulinta POA-gan: |
|--|---|
| <p>Soo-geli: Waxaad soo gelin kartaa foomkaaga buuxa akoonkaaga barta internetka ee WA Cares.</p> <p>Boostada ugu dir: DSHS The WA Cares Fund PO Box 45612 Olympia, WA 98504-5612</p> <p>La-xiriir WA Cares si aad u hesho macluumaad dheeraad ah:</p> <p>Wac: 844-CARE4WA (1-844-227-3492)</p> <p>Booqo: www.wacaresfund.wa.gov</p> | <p>Si foomka loo fuliyo iyada oo la raacayo: RCW 11.125.050.</p> <ul style="list-style-type: none"> • Magacaaga oo saddexan • Laba markhaati ama nootaayo <p>Macluumaadka WA Cares ayaa u baahan doonna:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Cinwaanka wadadaada • Lambarkaaga telefoonka gacanta • Lambarkaaga Aqoonsiga WA Cares (haddii la garanayo) • Macluumaadka xiriirka iyo magaca sharciga ah ee wakiilka <p>Caawimaad luuqadeed ayaa la heli karaa:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Adeegyada tarjumaadda luuqadda • Adeegyada luuqadda Dhegoolayaasha • Farta Braille • Garaac isticmaalayaasha TTY/TDD 1-800-833-6384 |



Awoodda Xaddidan ee Wakiilka ee Dheefaha WA Cares Fund



Limited Power of Attorney for WA Cares Fund Benefits

| |
|--|
| Magaca Ka-faa'iideystaha |
| Lambarka Aqoonsiga WA Cares (haddii la garanayo) |

Awoodda Xaddidan ee Wakiilka

Loogu talagalay Legal Name of Principal, Date of Birth:

- Wakiilka.** Waxaan u doortay Legal Name of Agent, in uu noqdo wakiilkeyga oo awood u leh in uu maareeyo dheefaheyga WA Cares Fund. Awoodda uu dokumentigan u oggolaaday shakhsiga kor ku xusan waxaa ay ku kooban tahay go'aamada ku saabsan dheefaha WA Cares Fund ee ma ahan dheefaha kale ee dowladda.
- Beddelka (ikhtiyaari).** Haddii wakiilka kor lagu xusay uusan awoodin ama uusan doonayn in uu tallaabo qaado, waxaan u doortay Legal Name of Alternate Agent, in uu noqdo wakiilkeyga oo awood u leh in uu maareeyo dheefaha WA Cares Fund.
- Xuquuqahayga.** Waxaan leeyahay dhammaan xuquuqaha aan ku gaari karo go'aanno aniga nafteyda oo ku saabsan dheefaha WA Cares Fund, iyadoon loo eegin haddii wakiilashadan ay shaqeyneyso, ilaa aan ka awoodi waayo in aan go'aan qaato.
- Ka-noqoshada.** Waxaan ka noqonayaa awood kasta oo kale ee Wakiilka oo Xaddidan ee loogu talagalay dheefaha WA Cares Fund ee aan horey u saxiixay. Waxaan ka noqon karaa awooddan wakiilashada waqti kasta.
- Awoodaha** Wakiilkeyga wuxuu awood buuxda u yeellan doonaa maareynta dheefaheyga WA Cares Fund oo ah sida buuxda ee wax-ku-oolka ah ee aan nafteyda sameyn karo, oo ay ku jiraan, laakin aan ku xaddidnayn, awoodda:
 - Isku qoridda, codsashada, doorashada, diidista, beddelidda, wax-ka-beddelidda, ama joojinta dheefaha;
 - U diyaar-garowga, xareynta, iyo joogteynta xaq-sheegashada codsadaha aasaasiga ah ee dheefaha WA Cares Fund;
 - Bilaabidda, ka-qaybgalka, u gudbinta khilaafaad xallin kale, heshiiska, diidista, ama soo-jeedinta ama aqbalidda heshiiska laga gaarey dacwadda khuseysa dheefaha WA Cares Fund kasta ee laga yaabo in codsadaha uu xaq u leeyahay in uu helo si waafaqsan cutubka 50B.04 RCW.
- Siideynta HIPAA.** Waxaan u oggolaaday WA Cares Fund in uu u siidaayo ama u fasaxo dhammaan macluumaadka uu maamulo Xeerka Isla-Xisaabtanka iyo Sii Lahaanshaha Caymiska Caafimaadka ee 1996 (HIPPA) ee la halmaala maareynta dheefteyda WA Cares Fund, Wakiilkeyga.
- Taariikhda Bilowga.** Awoodda wakiilka waxaa ay dhaqangaleysaa maalinta aan saxiixo.
- Taariikhda Dhammaadka.** Awoodda wakiilka waxaa ay dhammaanaysaa haddii aan ka noqdo ama marka aan dhinto.
- Joogto ah (ikhtiyaari).** Marka aan sanduuqan saxiixo, waxaan caddeynayaa in aan doonayo in Wakiilkeyga uu adeegsado awooddan wakiilka si uu u maareeyo arrimaheyga xitaa haddii aan xanuunsado, dhaawacmo, ama curyaamo, iyo in naafonimadeyda aysan saameyn doonin awooddan wakiilka.

Waxaan akhriyay oo aan fahmay macliimaadka kor ku xusan.

| | |
|--|------------------------|
| Saxiixayga (oo aan ku hor saxiixayo nootaayada laba markhaati: | Taariikhda La Saxiixay |
|--|------------------------|



**Awoodda Xaddidan ee
Wakiilka ee Dheefaha WA
Cares Fund**
Limited Power of Attorney
for WA Cares Fund Benefits



| |
|---|
| Magaca Ka-faa'iideystaha |
| Lambarka Aqoonsiga WA Cares (haddii la garanayo) |

Bayaanka Markhaatiyada

Markhaatiga 1aad

Markay taariikhdu tahay Date, Legal Name of Principle, ayaa waxay/wuxuu saxiixay wakiilashadan xaddidan ee loogu talagalay dheefaha WA Cares Fund aniga oo goobjoog ah. Waxaan oggolaaday in aan markhaati ka noqdo saxiixooda iyagaaanna iga codsadey. Qofkan lama lihi wax xiriir dhiig, guur, ama iskaashi qoys/guri oo gobolka u diiwaangashan. Qofkan kuma daryeelo guri ama xarun daryeel muddo-dheer.

| | |
|---------|----------------------------------|
| Saxiixa | Magaca Qoran ee Markhaatiga 1aad |
|---------|----------------------------------|

| | |
|-----------|---|
| Cinwaanka | Lambarka Teleefoonka (oo uu la socda furaha degaanka) |
|-----------|---|

Markhaatiga 2aad

Markay taariikhdu tahay Date, Legal Name of Principle, ayaa waxay/wuxuu saxiixay wakiilashadan xaddidan ee loogu talagalay dheefaha WA Cares Fund aniga oo goobjoog ah. Waxaan oggolaaday in aan markhaati ka noqdo saxiixooda iyagaaanna iga codsadey. Qofkan lama lihi wax xiriir dhiig, guur, ama iskaashi qoys/guri oo gobolka u diiwaangashan. Qofkan kuma daryeelo guri ama xarun daryeel muddo-dheer.

| | |
|---------|----------------------------------|
| Saxiixa | Magaca Qoran ee Markhaatiga 2aad |
|---------|----------------------------------|

| | |
|-----------|---|
| Cinwaanka | Lambarka Teleefoonka (oo uu la socda furaha degaanka) |
|-----------|---|

Warqadda Caddeynta (buuxiyay Nootaaye Dadweyne)

Gobolka _____
 Degmada _____
 Hortayda lagu saxiixay markay taariikhdu ahayd Date waxaa saxiixay Legal Name of Principal.

Saxiixa Nootaayada Dadweynaha

Taariikhda Dhicitaanka Magacaabista



**Awoodda Xaddidan ee
Wakiilka ee Dheefaha WA
Cares Fund**
Limited Power of Attorney
for WA Cares Fund Benefits



| |
|---|
| Magaca Ka-faa'iideystaha |
| Lambarka Aqoonsiga WA Cares (haddii la garanayo) |

Ku lifaaqan: Macluumaadka Xiriirka

Macluumaadkan xiriirka looma baahna si loo fuliyo heshiiska Awoodda Wakiilka laakiin waxaa u baahan WA Cares. Bixi macluumaadka ugu badan ee aad awoodo in aad bixiso.

Macluumaadka xiriirka ka-faa'iideystaha WA Cares

| | | |
|--------------------|---------------------|-----------------------------|
| Magaca Saddexan | Lambarka Telefoonka | Lambarka Aqoonsiga WA Cares |
| Cinwaanka Waddada | Magaalada | Gobolka Koodhka Degaanka |
| Cinwaanka Boostada | Magaalada | Gobolka Koodhka Degaanka |

Macluumaadka xiriirka wakiilka

| | |
|--------------------|------------------------------------|
| Magaca Saddexan | Lambarka Telefoonka |
| Cinwaanka Waddada | Magaalada Gobolka Koodhka Degaanka |
| Cinwaanka Boostada | Magaalada Gobolka Koodhka Degaanka |

Macluumaadka xiriirka wakiilka ee kale (haddii la doortay)

| | |
|--------------------|------------------------------------|
| Magaca Saddexan | Lambarka Telefoonka |
| Cinwaanka Waddada | Magaalada Gobolka Koodhka Degaanka |
| Cinwaanka Boostada | Magaalada Gobolka Koodhka Degaanka |